



Xidhiidhiyaasha Dugsiga iyo Waalidka

Barnaamijka Xidhiidhiyaasha Dugsiga iyo Waalidka (PALs) wuxuu fahansan yahay muhimada ay leedahay in hawlgalka waalidka ee dugsiyadu uu waxbarashadda ardeyda sare u qaadeyo. PALs, oo ah Xidhiidhiyaasha Dugsiga iyo Waalidka oo la soo gaabiyey waa macallimiin shahaado macallinimo haysta oo shaqo-buuxda kaga shaqeeya 20 Dugsiyada Ahmiyada la siiyey ee ku yaal degmada (waa dugsiyada hoose ee ku jira barnaamijka Title 1 ee derjada waxbarashaddo tahay 1 ama 2). Inkastoo PALs ay warbixinada u gudbiyaan maamuleyaasha dugsiyada, hadana waxay Waaxda Adeegyada Ardeyda ka helaan tababaro joogto ah.

Ujeeddada barnaamijka PAL waxaa weeyaan inuu abuurto bulsho aqoon leh oo horumarisa waxbarashadda dugsiyada. Hawlaha PAL waxay ahmiyada saaraan inay abuuraan xidhiidh wanaagsan oo dhexmara shaqaalaha dugsiyada iyo waalidiinta si ay ardeydu waxbarashadda ugu guuleystaan.

PALs waxay kaloo waalidiinta ka caawiyaan siyaabaha ay ilmahooda waxbarashadda uga taageeri lahaayeen, si ay u noqdaan kuwo waxbarashadda ku wanaagsan. PALs waxay arrintaas ku sameeyaan iyagoo waalidiinta si habbeysan uga caawineya inay fahmaan waxyaabaha uu ilmahoodu hada yeqaano, waxyaabaha ay u baahan yihiin inay bartaan, iyo siyaabaha ay ilmahooda u caawin karaan inta ay guriga iyo dugsiyada joogaan.

Tabaha la isticmaaleyo waxaa ka mid ah:

- in sare loo qaado warbixinada iyo xidhiidhaha lala sameynayo waalidiinta ee ku saabsan heerka waxbarashadda ee ardeyga, iyo siyaabaha ay waalidiintu ilmahooda waxbarashadda uga taageeri karaan
- in sare loo qaado heerarka warbixinada iyo qalabka caawineya macallimiinta si ay awood ugu helaan inay waalidiinta ilmahooda waxbarashadda uga caawiyaan
- qorsheynta iyo hirgelinta dhacdooyinka lagu jaangooyey inay ka caawiso waalidiinta sare u qaadista xirfadaha wax akhriska iyo wax qorista iyo fahanka xisaabta sida Jimceyaasha Qoyska, Akhriska Qoyska iyo Xiisadaha Farshaxanada Luuqada, Xisaabta Qoyska, Naadiyada Aabbeyaasha, Siyaabaha aad Ilmahaaga uga Caawineysid wakhtiyada Shaqada-guriga, iyo Kullamada Macallinka/Waalidka oo si wanaagsan u hirgela.
- Si wadajir ah ula shaqeynta kooxda hoggaamiyaasha goobta si aad hawlaha dugsiyada ka socda u fahantid iyo abuuritaan bulsho aqoon leh.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie Casey Foundation

SOMALI VERSION: PARENT ACADEMIC LIAISONS WINTER 2004

Warbixinada kala xidhiidh: Waaxda Adeegyada Ardeyda: (619) 725-5597
Su'aalaha warbaahinta: (619) 725-5578

www.sandi.net

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 140,000 oo ardey, waxayna leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo 17,000 oo shaqaale ah. DMS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageerto dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."

OO KOOBAN

Sannadka 2003:

- ❖ PALs waa macallimiin shahaado macallinimo haysta oo shaqo-buuxda kaga shaqeeya 20 Dugsiyada Ahmiyada la siiyey si ay hawlgalka waalidka isugu dubbaridaan una xoojiyaan.
- ❖ 10 PALs oo cusub ayaa lagu biiriyey dugsiyada derajada 2 ee API
- ❖ Shan ka mid ah PALs u horreeyey waxay u shaqeeyaan la-taliye ahaan si ay u caawiyaan PALs cusub
- ❖ Hawlaha PALs waxay ahmiyada saaraan horumarinta waxbarashadda ardeyda
- ❖ PALs waxay qabtaan tababaro, waxay kaloo waalidiinta iyo shaqaalaha u qeybiyaan warbixino sax ah iyo qalab hawlahooda ka caawineya
- ❖ PALs waxay waalidiinta ka caawiyaan inay fahmaan waxyaabaha ilmahooda looga baahan yahay inay yeqaanaan si ay u noqdaan ardey guuleysata iyo inay waalidiinta u fidiyaan siyaabo gaar ah oo ay ilmahooda ku caawin karaan
- ❖ PALs waxay sameeyaan dhacdooyin lagu jaangooyey inay ka caawiso waalidiinta sare u qaadista xirfadaha wax akhriska iyo wax qorista iyo fahanka xisaabta